

Juunyo 2021

deriska kuwa ogaadaw

Tusaha SDCI ee Ogaysiisyada Xaafadda iyo Faallooyinka

Maxay Calaamadaha Ogaysiinta Isticmaalka Dhulka Seattle ay Macno igu fadhidaa?

Markaad aragto Ogeysiiska Calaamadda Waxqabadka Isticmaalka Dhulka ee La Soo Jeediyeey, waa martiqaad inaad ka qayb qaadato horumarka beeshaada! Ogeysiiskan dadweynaha waa fursaddaada aad kaga faalloon karto mashruuca la soo jeediya. Marka Waaxda Dhismaha iyo Kormeerka Seattle (SDCI) ay hesho arjiga isticmaalka dhulka ee mashruuca la soo jeediya, SDCI waxay soo dhajin kartaa:

- Calaamado waaweyn oo 4 x 8-fudh ah.....oo loo yaqaano Calaamadaha Ogeysiiska Weyn..... ee loogu talagalay soo jeedinta Dib-u-eegista Naqshadda ama Xeerka Siyaasadda Deegaanka (SEPA)
- Calaamado yar-yar oo ah 18 x 24-injiis, oo loo yaqaano Calaamadaha Isticmaalka Dhulka, ee loogu talagalay soo jeedinno kale, oo ay ku jiraan kala duwanaansho, adeegsi shuruudaysan, qayb hoosaadyo, iyo inta badan mashaariicda xeebta
- Calaamado yaryar oo



SDCI waxay ogeysiisyada codsiyada isticmaalka dhulka qaarkood sidoo kale u diraan milkiilayaasha hantida iyo kiraystayaasha 300 oo fudh gudahood ku nool ee mashruuca laga soo jeediyay. Qaar laga reebayo ayaa jiri doono.

Fadlan ogow, mashaariic inta u badan uma baahna ogeysiis dadweyne. Mashaariicdaasi ma

Yaa fikrad bixin karo?

Qof kasta! Dadka deegaanka, ardayda, shaqaalaha, iyo milkiilayaasha ganacsiga. Qof kasta oo ay saameyso soo jeedinta mashruucan.

Waa Maxay Sababta loo codsado Fikradaha Dadwynaha?

Magaaladu waxay aqoonsan tahay in dadku aqoon xildheer ah u leeyihiin meelaha ay ku nool yihiin kana shaqeeyaan. SDCI waxay uruurisaa faallooyinka si ay nooga caawiso inaan fahanno walaacaaga iyo danahaaga ku saabsan mashruuca gaar ah, aqoonsiga saamaynta ay yeelan karto, iyo helidda xalka baaxadda dib -u -eegistayada sida uu dajiyay Xeerka Isticmaalka Dhulka. Sidoo kale waa fursad lagu soo jeediyo talooyin wax ka beddeli kara naqshadda mashruuca.

Goorma ayaa fikrado la bixin Karaa?

Calaamadaha isticmaalka dhulka iyo qaababka kale ee ogeysiiska dadweynaha ayaa si cad u qeexaya taariikhda bilowga iyo dhammaadka xilliga faallada rasmiga ah. Si kastaba ha ahaatee, SDCI waxay tixgelin doontaa wixii faallo ah ee la helo ka hor intaan go'aanka la gaarin, iyadoo loo eegin inay ku timid muddada faallada rasmiga ah. Fadlan maskaxda ku hay, soo gudbinta faallooyinkaaga goor hore ayaa ah habka ugu wanaagsan ee lagu hubin karo inaan helno waqti aan ku tixgelinno falanqayntayada.

Yaa Akhrinaya Fikradahayga?

Qorsheeyaha isticmaalka dhulka ee loo xilsaaray inuu dib u eego mashruuca ayaa akhrin doona dhammaan faallooyinka wuxuuna tixgelin doonaa kuwa ku jira baaxadda dib -u -eegisteena. SDCI waxay gelisaa dhammaan faallooyinka nidaamka raadraaca oggolaanshahayaga, oo loo yaqaan Xariirka Adeegyada Seattle, hoosta lambarka diiwaanka. Dhammaan faallooyinka dadweynaha waa diiwaanada dadweynaha, taas oo macnaheedu yahay in qof walba uu arki karo.



Waa Maxay Faallooyinka La Tixgaliyo?

SDCI waxay kaliya tixgelinaysaa faallooyinka ku jira baaxadda dib -u -eegista sida ku cad Xeerka Isticmaalka Dhulka. Tusaale ahaan, ma ka hadli karno faallooyinka ku saabsan saamaynta mashruuca ee qiimayaasha hantida ama aragtida gaarka ah. Macluumaad dheeri ah, ka eeg “Sida Si Wax ku ool ah Looga Faalloodo” websaytkayaga www.seattle.gov/sdci/permits/comment-on-a-project.

Sideen U Heli Karaa Wixii Cusub?

Waxaad codsan kartaa inaad hesho ogaysiisyada mustaqbalka ee ku saabsan mashruuca haddii aad soo gudbiso codsi qoraal ah oo ku saabsan macluumaadkan oo aad siiso emayl ama cinwaanka waddada. Waxaad sidoo kale ku dari kartaa tani nuxurka warqadda faalladaada.

Sideen U Samayn Karaa Faallooyin Wax -ku -ool la?

- U sharax sidaa aad u xiisaynaysid mashruuca.
- Dib u eeg faylka mashruuca iyo qorshayaasha.
- Bixi goob dheeraad ah ama macnaha guud ee aad u malaynayso inuu muhiim yahay.
- U sheeg walaacaaga, danahaaga, ama dookhyadaada si cad oo soo kooban.
- Tixraac shuruudaha, siyaasadaha, ama tilmaamaha khuseeya arjigga.
- Soo jeedi beddello ama weydii daraasado aan wali la bixin.
- Aqoonso sifooyinka mashruuca gaarka ah ee aad taageerto oo aad u malaynayso inaan wali la beddelin.
- Bixi macluumaadkaaga xiriirka si aan kuu wergelino go'aannada iyo/ama shirarka dadweynaha.

Tusaalooyinka gaarka ah ee faallooyinka wax -ku -oolka ah, so booqo Faallooyinkeena websaydhka Mashruuca www.seattle.gov/sdci/permits/comment-on-a-project.

Maxaa Dhiiri Gelin karo Kulanka Dadweynaha?

Mashaariicda qaarkood waxay u baahan yihiin in la qabto kulan dadweyne . Mashaariicda kale, kulan dadweyne ayaa laga yaabaa in la qabto marka SDCI ay codsi ka hesho ugu yaraan 50 qof. SDCI waxay bixisaa ogeysiiska shirarka dadweynaha ee oo ku saabsan Isticmaalka Dhulka, oo ku qoran calaamada lagu dhajiyay agagaarka guriga, iyo ogeysiis loo diro qof kasta oo fikrad ka bixiyay mashruuca.

Isbeddel ma keeni karaa?

Haa, waad awoodaa Faallooyinka dadweynaha ayaa ku dhiirrigeliyay horumariyayaashu inay wax ka beddelaan baaxadda mashruucan ama ay wax ka beddelaan naqshadda si ay si wanaagsan uga jawaabaan tabashooyinka ama danaha bulshada.

Qorsheeyaha isticmaalka dhulka ee loo xilsaaray inuu dib u eego mashruuca ayaa si taxaddar leh u fiirinaya dhammaan faallooyinka dadweynaha ka hor inta SDCI aysan so daabicin go'aanka.



Waa Maxay Rafcaanaddu?

Iyadoon maxkamad la aadin dadka ayaa la siindoonaa fursad ay kaga soo horjeedsadaan go'aanka SDCI haday noqoto mashaariicda inta badan ee u baahan in la dhajiyo calaamado. Tan waxaa loo yaqanaa Rafcaan. Macluumaadka ku saabsan sida loo gudbisto rafcaanka ayaa ku jira ogeysiiskeena go'aanka. Rafcaannada badankooda waxaa maqla Baadhaha Dhageysiga Magaalada.

Rafcaannka kabacdi.

Haddii labada dhinac ee rafcaanku aysan ku raacsaneen natiijada, waxay ka hor iman karaan go'aanka Baaraha maxkamada.

Wixii Macluumaad Dheeraad ah:

Si aad fikrad ka bixiso:

Ku soo gudbi faallooyinkaaga qoran adigoo isticmaalaya qalabkeena faallooyinka dadweynaha, www.seattle.gov/project/comment, ama boostada ku soo dir: Seattle Department of Construction and Inspections, Attn: Public Notice, P.O. Box 34019, Seattle, WA 98124-4019.

Si aad u hesho ogeysiiska codsiyada isticmaalka dhulka, go'aamada, iyo kulamada:

Booqo bogeeena PRC, www.seattle.gov/sdci/about-us/who-we-are/public-resource-center, oo aad iska qorto Wargeyskeena Xogta Isticmaalka Dhulka.

Wixi ku saabsan Macluumaadka hantida, khariidadaha, iyo diiwaanada taariikheed:

Ku isticmaal adeegyadayada internetka www.seattle.gov/sdci/resources ama booqo PRC oo ku taal dabaqa 20 -aad ee Tower Seattle Municipal, 700 5th Avenue.

Si aad ula socoto oggolaanshaha:

Adeegso Xariirkayaga Adeegyada Seattle, <https://cosaccela.seattle.gov/>, si loo ogaado xaaladda ruqsadda.